# Barnaamijka Fududeyn Waxbarashada (Individualized Education Program, IEP) Shakhsi ahaaned

**Tilmaamta Waalidiinta Caruurta & Dhalinyarada (Da'da 3-21)**

Daabacaadani waxay kamid tahay taxane ku saabsan ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka waxbarashada gaaarka ah. TIlmaamaha kale ee waalidka waxaa kamid ah:

Dhedhexaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee Individuals with Disabilities Education Act, IDEA Cabashooyinka Gobolka ee Loo Qoray Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA Cabashooyinka Nidaamka Aan Dhamaanin ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabyada Dhagaysiga IDEA
Kulamada Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA

CADRE Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

*Fiiro: Fududaynta IEP kama jirto dhamaan gobolada oo dhan mana waajibinayo IDEA. Sidoo kale, daabacan looguma talo gali inay turjunto, wax ka badasho, ama badasho wixii nidaam badbaado ee IDEA ama shardiyada sharciga fedaralka iyo gobolka.*

## Waa maxay Fududaynta IEP?

Fududaynta IEP waa nidaam ikhtiyaar ah, oo aanu waajibinin IDEA, kaas sheegaya in hay'ada waxbarashada gobolka (state educational agencies, SEA) ama degmooyinka dugsigu ay siin karaan waalidiinta iyo dugsiyada. Kulanta fududaynta IEP waxa uu lamid tahay kulanka IEP, marka laga reebo in fududeeyuhu kasoo qayb galayo kulanka.

Fududeeyuhu waxa uu ka caawiyaa xidhiidhka xubnaha kooxda, mana gaadho wax go'aan ah oo ku saabsan ardayda IEP. Hadafka kulanka fududaynta IEP waa in lagu curiyo IEP ay taageeraan xubnaha kooxdu faa'idona u leh ardayga.

- Qoysaska iyo dugsiyadu waxay ku heshiiyeen in fududeeye uu kasoo qayb galo kulanka IEP.
- Fududeeyuhu waxa uu xaqiijinayaa xidhiidh furan waxaanu xaqiijiyaa in xubin kasta oo katirsan IEP ay si buuxda uga qayb gasho kulanka.
- Hadii isafgaranwaa yimaado inta kulanku socdo, fududeeyuhu waxa uu ka caawinayaa kooxda inay argtidooda cadeeyeen oo ay xaliyaan.
- Caadiyan fudideeyuhu kama hadlo wixii aan la xidhiidhin IEP.

## Faa'idada Fududaynta IEP

Fududeeyuhu waxa uu dejiyaa qaabka xidhiidhka wax ku oolka leh iyo dhagaysiga, waxaanu kalahaqeeyaa kooxda IEP inay soo dhigaan qodobada ay ku heshiin ama ku muransan yihiin. Sidoo kale, fududayntu waxay noqon kartaa:

- *dhisida iyo hormarinta xidhiidhka* xubnaha IEP dhaxdooda, gaar ahaan marka ay ku adag tahay inay wada shaqeeyaani;
- waxa uu ku dhiiri geliyaa waalidiinta iyo shaqaalaah inay isla eegaan *ikhtiyaaro cusub* si ay uga hadlayaan mushkilada aan la xalin;
- caawimoxalinta is afgaranwaaga si ka dhakhso badan ikhtiyaarada kale ee *xalinta khilaafka*; iyo
- *go'aan qaadashada xubnaha kooxda* kuwaas oo ardayda si wanaagsan u yaqaan.

***Fududeeyaha...***

- Waxa uu curiyaa ajandaha iyo shuruucda kulanka kooxda IEP.
- Hagaa aqoon iswaydaarsiga isaga oo waydiina su'aalo ardayda ku saabsan, sida:
    - Waa sidee dadaalka xaalada ardaygu?
    - Isbadal sidee ah, hadii ay jiraan, ayay tahay in lagu sameeyo hadafka ardayga?
    - Dariiq noocee ah ayaynu ku caawin karnaa isaga ama iyadu si ay u gaadho himiladiisa iyo ahdaaftiisa?
- Ilaalinta inayna xubno ka bixin hawsha iyo wakhtiga kulanka loo asteeyay.
- Su'aalo inuu ka waydiiyo si loo cadeeyo qodobada lagu muransan yahay iyo in la keeno xal lagu hawl geli karo.
- Inuu ka caawiyo xaqiijinta in luuqada IEP ka turjumayso go'aanka la gaadhay intii uu socday kulanku.
- Aan dhinacna dhinaca saarin, aan go'aan kusoo rogin kooxda, cida eedeynin, ama sheegin hadii go'aanku sax yahay ama khalad yahay.

## Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiiyo Fududaynta IEP

*Yaa dalban kara fududaynta IEP?*

Waaliidinta ama shaqaalaha dugsiga ayaa dalban kara fududaynta IEP.

*Goorta iyo sidee ayaan u dalban karaa fududaynta IEP?*

Waxaad dalban kartaa fududayn kulanta IEP wakhtiga aad doonto. La xidhiidh dugsiga ilmahaaga si aad u ogaato hadii ay jirto fududayn IEF ahi. Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa SEA gaaga ama xarunta waalidka wixii macluumaad ah ee ku saabsan helitaanka iyo isticmaalka fududeeyaha kulanka IEP ee deegaankaaga.

*Yaa dooranaya fududeeyaha?*

Mararka qaar waxaa fududeeyayaasha lagu doortaa nasiib, kaayo, ama qaab dhax dhaxaadnimo. Marar kale, waalidiinta iyo dugsiyadu waxay wada dooran karaan fududeeye isaga oo wada jira.

*Ma xaq ayaan u leeyahay inuu fududeeye aan ku helo kulanka IEP?*

Maya. Fududaynta IEP waxaa lagu dalbadaa IDEA. Waydii degmada dugsigaaga ama xarunta waalidiinta si aad u ogaato nooca ikhtiyaarada xalinta mushkilada wada shaqaynta ee adiga iyo kooxda IEP idiin diyaar ah.

*Ma jiraa wax wargelin nidaam ah la isiin doono oo ku saabsan kulanka IEP ee la fududeeyay?*

Haa, sida kulama kale ee IEP oo kale, waxaa laga helaa nidaam wargalinta ku saabsan IDEA. Degmadu waa inay waalidiinta siisaa wargalinta ku munaasabka ah oo ay kamid tahay goorta iyo wakhtiga uu kulanku ka dhacayo, cida kasoo qayb galaysa, iyo ujeedada kulanka.

Bilawga marka ardaygu yahay 16 sano jir, wargalinta waa inay ka muuqata kulanka oo uu kamid tahay samaynta himilada dugsiga sare kadib iyo adeegyada kala guurka ah.

*Fududeeyuhu waxa go'aan ah miyuu gaadhaa?*

Maya. Fududeeyayaasha waxaa lagu tobobaray inay ka shaqeeyaan habsami u socodka wada hadalka iyo qaabka loosoo bandhigayo iyo xalinta khilaafaadka. Waxay ka caawinayaan kooxda IEP inay ka wada shaqeeyaan siday u diyaar lahaayeen IEP wax ku ool ah oo ardayga ah. Xubnaha kooxda IEP ayaa go'aanada gaadha.

*Yaa kasoo qayb gala kulanka IEP ee la fududeeyay?*

Xubnaha kooxda IEP ayaa kasoo qayb gala, oo ay kamid yihiin waalidiinta ardayda, macalimiinta waxbarashada caadiga ah iyo ta gaarka ah, wakiilo degmada dugsiga ah, iyo cid sharixi karta sida natiijada qiimayntu uga muuqanayso IEP-ga ardayga.

IDEA waxa sidoo kale uu bixiyaa in waalidiinta ama degmada dugsigu keeni karaa dad kale oo aqoon u leh ama khabiir si gaar ah u ah ardayda, sida u ololeeyayaasha.

*Ardaydu miyay ka qayb geli karaan kulanta IEP ee la fududeeyay?*

Waalidka ayaa ikhtiyaar u leh inuu ardaygu kasoo qayb galo kulanta IEP ee la fududeeyay, taas oo ku xidhan da'da ardayda iyo heerka

uu taagan tahay garaadkiisu. Ka qayb galka kulanta IEP ee la fududeeyay waxay siinaysaa fursad wanaagsan ardayga si uu wax uga barto si nafta loogu hadlo.

Hadii uu ardaygu yahay 14 ama kawayn yahay, ama hadii laga hadlayo amuuraha kala guurka, ku dhiiri geli inuu ardaygu ka qayb galo curinta IEP-giisa si ay kor ugu qaado in natiijada guul laga gaadho. Gobolada qaar, maamulka go'aan gaadhida waalidka wixii ku saabsan gudbinta IEP ee ardayda marka uu gaadho da'da uu garaadkiisu dhamaystirmo.

> Fududaynta IEP lagama wada helo dhamaan gobolada ama degmooyinka dugsiyada.
>
> Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay la xidhiidhaan SEA-gooda, degmada dugsiga, ama xarunta waalidka wixii macluumaad dheeraad ah.

*Goorma iyo halkee lagu qabanayaa kulanta IEP ee la fududeeyay?*

Kulanta IEP ee la fududeeyay caadiyan waxaa wakhtigiisa mudaysa degmada dugsiga, iyada oo lala kaashanayo waalidka, waxaana la qabtaa goorta oo lagu qabtaa goorta lagu wada heshiiyay.

*Ma kharash ayaa la iga qaadayaa kulanka IEP ee la fududeeyay?*

Sida kulamada kale ee IEP oo kale, kulanka IEP ee la fudeeyay wax kharash ah kuma taagna waalidiinta.

*Siday wax noqonayaan hadii kooxdu ku heshiin waydo IEP-ga kulanka la fududeeyay?*

Hadii lagu xalin waayo mushkilada, muranka, ama mushkilada kulanta IEP ee la fududeeyay, waxaa wanaagsan inaad isla eegtaan cid idin dhex dhexaadisa ama qaab kale oo lagu xaliyo khilaafka. Ka qayb galkaaga kulanka IEP ee la fududeeyay saamayn kuma yeelanayso xuquuqdaada waalidnimo.

### *Siday wax noqonayaan hadii aad turjumaan u baahanahay?*

Waa muhiim inaad fahmi karto oo aad si buuxda uga qayb geli karta dacwada nidaamka socda. Sii ogaysii degmada dugsiga kahor kulanka IEP inaad u baahan tahay turjumaan, si ay kuugu diyaarin karaan cid kaa caawisa luuqada inta lagu jiro kulanka. La xidhiidh degmada dugsiga ama SEA wixii macluumaad dheeraad ah.

## Qaababka Aad Ugu Diyaar Garoobi Karto Fududaynta IEP

- Diyaarso liiska waxyaabaha aad doonayso inaad ka hadasho iyo su'aalaha aad doonayso inaad waydiiso.
- Ka fikir waxa muhiim kuu ah adiga IEP-ga ilmahaaga oo qoro shayadaas.
- Iswaydii sadex su'aalood oo muhiim ah:
    1. Halkee ayuu ka marayaa wiilkayga ama gabadhaydu hormarka waxbarashadeeda?
    2. Halkee ayaan doonayaa inuu gaadho wiilkayga ama gabadhaydu sanad kadib sideena lagu qiyaasi karaa waxaa laga filanayo?
    3. Qaabkee ayay kooxda IEP u caawin karaan isaga ama iyada si uu u gaadho waxa laga filanayo?
- Isku duba rido waraaqahaaga. Duwaan gasho taariikhaha oo qoraal ku dul qoro. Waxaa dhici karta inay tahay inaad macluumaadka qaar ka samayso nuqul si aad ula wadaagi karto kooxda.
- Diyaar u ahaw inaad dhagaysato oo aad si taxadir leh u eegto fikirada dadka kale soo jeedinayaan.
- Kaalay wakhtiyar kahor kulanka IEP, si aad ugu diyaar garawda inaad ka qayb gasho.
- La hadal tobobarka waalidka iyo xarunta macluumaadka ama xarunta khayraadka waalidka bulshada. Xubnaha shaqaalaha ayaa kaaga jawaabaya su'aalahaaga waxayna kaa caawinayaan inaad isku diyaariso kulanka. Kiisaska qaar, xubin shaqaalada xarunta waalidka ah ayaa kasoo qayb gali karta kulankaa IEP iyada oo adiga kula socota.
- Ka qayb gal aqoon iswaydaars ama tobobar ay qabteen xarunta waalidka si aad wax uga ogaato kaalintaada iyo masuuliyadahaaga xubin kooxda IEP ahaan.

## II Macluumaad Muhiim ah

Dhamaan liiska xarumaha waalidka ee wakhtigan ee dalka oo dhan waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka iyo Khayraadka Waalidka (Center for Parent Information and Resources, CPIR): parentcenterhub.org/find-your-center ama lahadal (973) 642-8100

Xarunta Xalinta Khilaafka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah (Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education, CADRE) waa xarun kaalmo farsamo oo qaran oo qalin khilaafka ah: cadreworks.org ama lahadal (541) 686-5060

Macluumaadka ku saabsan Sharciga Waxbarshada Shakhsiga Laxaadka La' (IDEA) waxaa laga heli karaa onlayn ahaan: https://sites.ed.gov/idea/

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee fududaynta IEP, xalinka khilaafka waxbarashada gaarka ah, iyo ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka ee laga heli kara IDEA, booqo Websaytka CADRE:

cadreworks.org

## Hel Macluumaadka Lagala Xidhiidhayo Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

**Region 1 Parent TA Center**
NJ Statewide Parent Advocacy Network
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100
Faakis: (973) 642-8080
Websayt: spanadvocacy.org

**Region 2 Parent TA Center**
Exceptional Children's Assistance Center
907 Barra Row, Suites 102/103
Davidson, NC 28036
Taleefan: (704) 892-1321
Faakis: (704) 892-5028
Websayt: ecac-parentcenter.org

**Region 3 Parent TA Center**
Parent to Parent of Georgia
3070 Presidential Pkwy, Suite 130
Atlanta, GA 30340
Taleefan: (800) 229-2038
Faakis: (770) 458-4091
Websayt: p2pga.org

**Region 4 Parent TA Center**
WI FACETS
600 W. Virginia St., Ste. 501
Milwaukee, WI 53204
Taleefan: (877) 374-0511
Faakis: (414) 374-4655
Websayt: wifacets.org

**Region 5 Parent TA Center**
PEAK Parent Center
611 N. Weber, Suite 200
Colorado Springs, CO 80903
Taleefan: (800) 284-0251
Faakis: (719) 931-9452
Websayt: region5ptac.org

**Region 6 Parent TA Center**
Matrix Parent Network & Resource Center
94 Galli Drive, Suite C
Novato, CA 94949
Taleefan: (415) 884-3535
Faakis: (415) 884-3555
Websayt: matrixparents.org

**Center for Parent Information and Resources (CPIR)**
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100 Faakis: (973) 642-8080
Websayt: parentcenterhub.org

## Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

CADRE waxay waraaqa u diyaarisaa si waafaqsan xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Heshiika Xafiiska Isku Duwida Baraamijyada Waxbarashada Gaarka ah Lam. H326D080001. Tina Diamond, Ph.D., waxay ku shaqaysaa sarkaalka mashruuca. Aragtiyada lagu soo bandhigay halkan khasab maaha inay ka turjumaan aragtida ama shuruucda Waaxda Waxbarashada. Wixii alaab ah, adeegyo ama shirkado lagu sheegey ee qoraalka sare kaas oo ay ku amaantay Waaxda Waxbarashada Maraykanku maaha mid loogu talo galay ama qiyaas lagaga bixiyay. Qoraalkani waa mid dadwayne. Waa la ogol yahay in qayb kamid ah ama dhamaan dib nuqulo looga samaysan karo. Inkasta oo in ogolaansho la dalbado marka dib loo daabacayo ayna ahayn mid waajib ah, diidmada waxaa leh: CADRE (2014). Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) La Fududeeyay, Eugene, Oregon, CADRE. Daabacaada waxaa sidoo kale kamid ah linkiyo iyo Cinwaano Websayto (URLs) ay sameeyeen oo ay gacantana ku hayaan hay'ada madax banaan oo loogu soo geliyay si ay akhristayaashu u heli karaan. Waaxdu kama masuul ah saxnimada macluumaadkan. Waxyaabaha qaar kamid ah ayaa hore loo sameeyayay iyada oo Kala Kaashanayo Farso ahaan Xarumaha Waalidka BAHOOBAY. Taariikhda Daabacaada: Oktoober 2014.